

Ka qayb qaadashaadaadu waa muhiim!

Macluumaadka bukaan socodka ee ku saabsan diiwaanka tayada RaraSwed

Waa maxay RaraSwed?

Waa diiwaan tayo qaran oo suurtagelinaya in lala socdo oo la horumariyo daryeelka caafimaadka iyo gacan ku haynta adiga iyo bukaan socodka kale ee aad isku xaaladda tihiin. Waxay caawinaysaa in la abuurto qaab-dhismeed wadajir ah oo heer qaran ah oo khuseeya xaaladaha caafimaadka ee dhif iyo naadirka ah. Ka qayb qaadashadaadu waxay saamaynaysaa oo kor u qaadaysaa aqoonta daryeelka caafimaadka.

Maxaa la diiwaangelinayaa?

Macluumaadka la diiwangelinayo waxaa ka mid ah xogta qofka ee gaarka ah, xiriirka uu qofku la leeyahay daryeelka caafimaada, ogaanshaha, baaritaanada cudurada iyo calaamadaha cudurada iyo natiijooyinka baaritaanada.

Xogta waxaa laga keeni karaa buuggaaga diiwaanka caafimaadka, adiga ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka.

Xogtaada diiwaangashan waxa loo isticmaali karaa oo keliya:

- si loo horumariyo oo loo sugo tayada daryeelka caafimaadka
- in la soo saaro tirokoob
- cilmi baadhis ku saabsan caafimaadka iyo daryeelka bukaan.

Daabacaadda xogta

Marka macluumaadka diiwaanka ku jira looga baahdo in laga soo saaro si cilmi baarista loogu sameeyo waa khasab inay

oggolaanshaha marwalba ay bixiso Guddiga dib-u-eegista anshaxu (EPN).

Marka la daabacayo xogta, adiga si shaqsi ahaan ah laguuma

aqoonsan doono laakiin natiijooyinka waxaa lagu soo bandhigayaa heerka kooxeed. Taas macnaheedu waxa weeye in aan la arki karin shakhsiyadka ay xoguhu ka kala yimaadeen.

Qarsoodi iyo amni

Macluumaadkaagu waa qarsoodi sidaas darteed waxaa loo maaraynayaa si la mid ah sida buuggaaga diiwaanka caafimaadka. Shaqaale loo igmaday oo keliya ayaa wax ka ogaan kara

xogtaada. Xogtaada diiwaangashan waxaa loo ilaalinaya

iyadoo la isticmaalayo tirooyin, in si ammaan ah loo galo iyo iyada oo loo marayo hab sistem ah

Tani waxay hubinaysaa in qof aan la ogolayn aanu heli karin xogtaada

Xuquuqdaada

- Ka qayb qaadashaadaadu waa muhiim!
- Waxaad codsan kartaa in xogtaada laga saaro diiwaanka wakhti kasta iyadoo aanay saamayn daryeelka caafimaad ee lagu siiyo.
- Had iyo jeerna waxaad xaq u leedahay inaad ogaato macluumaadka lagaa diiwaangeliyey.
- Haddii macluumaadkaagu khaldan yahay ama uu maqan yahay waa lagu ogolyahay inaad saxdo.
- Waxaad heli kartaa macluumaad ku saabsan qaybta daryeelka iyo wakhtiga qof ayaa qaatay macluumaadkaaga.
- Waxaad xaq u leedahay magdhow haddii xogtaada loo maareeyo si xadgudub ah oo leh Xeerka ilaalinta xogta (GDPR).
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato xogta shakhsiyeed ee lagaa diiwaangaliyay adiga oo ku jira tayada diiwaanka (waxa loogu yeero qoraalka diiwaanka kooban).

Haddii aad rabto macluumaad intaa ka badan ama aad rabto in xogtaada la tirtiro, arag:

www.csdsamverkan.se



Ama la xidhiidh daryeelka caafimaadka gobolka ee CSD, ciwaanka waxaad ka heli kartaa websaydka

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa:

Wakiilka Ilaalinta Xogta ee Gobolka Skåne

Gobolka Skåne

291 89 Kristianstad

Xarunta telefoonka laga xiriiriyo (växel) 044-309 30 00

region@skane.se